

Talooyin Waraysi



Aan kugu hagno habraaca wareysiga

Talooyinka Waxtarka leh ee Waraysiga:

- **Samee xog baarid - si aad shirkadda wax oga ogaato.**
Ogow xog badan oo ku saabsan shirkadda, taariikhdeeda, xaaladdeeda hadda iyo mustaqbalkeeda inta aad awooddo. Ilaha: Intarneetka iyo maktabadda-ee joornaalada xilliyeedka iyo ganacsiyeed, maqaallada, warbixinnada sannadlaha ah-saaxiibada iyo La taliyayaasha CareerCenter. U diyaargarow inaad waydiiso su'aalo wanaagsan oo ku saabsan shirkadda iyo jihadeeda.
- **Wax ka ogow - Jagadaada.**
Faham buuxa ka hayso jagadaada, waajibaadkeeda muhiimka ah, masuuliyadaha aasaasiga ah iyo filashooyinkeeda. U diyaargarow inaad waydiiso su'aalo wanaagsan: Yaa ku guulaystey maxaase dhaliyay guusha? Yaa ku guuldarraystay maxaase dhaliyay guuldarrada? Yay hoostimaaddaa oo kormeero jagadan? Yaa hoos yimaado oo ay kormeertaa jagadan? Maxay yihiin yoolalka jagada lixda bilood ee ugu horreeya; sanadka ugu horreeya?
- **Dadaal geli barashada - naftaada.**
Si fiican dib-ugu-eeg taariikhdaada xirfadeed. Dib-u-eegis ku samee taariikhaha, jagooyinka, waajibaadka, masuuliyadaha iyo guulaha aad gaartay. Ogow meelaha aad ku fiican tahay iyo meelaha aad ku liidato. U diyaargarow inaad soo qaadato tusaalooyin gaar ah oo ku saabsan guulaha aad gaartay iyo sida jagooyinkaaga gaarka ah ay kuugu diyaariyeen adiga shaqadan.

Talooyin Xasuus Mudan:

- Toban daqiiqo ka hor u imow waraysiga, haddii aan si kale lagu farin.
- U buuxi dhammaan codsiyada si habsami leh oo dhammaystiran.
- Ku salaan waraystaha magaciisa qoyska oo dhoola caddee adiga oo si diirran u gacan gelinayo.
- Sug in lagu tilmaamo inaad fadhiisato.
- Ha cabbin sigaar ama ha calalin xanjo.
- Su'aalaha ha kaga jawaabin un kaliya "haa" ama "maya". Sharrax jawaabahaaga adiga oo adeegsanayo tusaalooyin si aad sawir cad uga bixiso meesha, goorta, sida, waxa aad samaysay iyo sababta aad u samaysay, laakiin ha miisaannaado hadalkaaga.
- Ku nuuxnuuxso guulaha xirfadeed ee aad gaartay.
- Ha ka sheegin faalooyin qallafsan loo-shaqeeyaashadii hore iyo kuwa hadda.
- Ha ku mashquulin mushaharka, komishanka, gunnada ama fasaxa waraysiga ugu horreeya.
- U sheeg loo-shaqeeyaha waxa aad u samayn doonto iyaga, HA waydiin waxa ay iyaga kuu qaban karaan.
- Had iyo jeer si daacad ah uga hadal naftaada.

Wixii faahfaahin ah kala xiriir:

Maine CareerCenters



www.mainecareercenter.gov



MaineDOL.CareerCenter@maine.gov



207-623-7981 | Isticmaalayaasha TTY wac Gudbinta Maine 711



Waxda Shaqada ee Maine waxay bixisaa fursad loo siman yahay ee xagga shaqada iyo barnaamijyada.

Kaalmooyinka iyo adeegyada dheeraadka ah ayaa diyaar u ah shakhsiyaadka naafada ah haddii la codsado.